



Isbedelada lagu sameeyey Deeqaha shuruudaha xaq- lahaanshaha farshaxanka

Waxaa jirta baahi badan oo ku wajahan deeqahayaga, mana awoodno inaanu lacag ugu deeqno dhamaan dalabyada aanu helo ee xaq u leh.

Si aanu u maamulo baahida korodhay, una hubino in aanu deeqaha lacagaha si isu miisaaman u qaybino, laga bilaabo 31 Maarso 2007 Deeqaha shuruudaha xaq-
lahaanshaha farshaxanka, oo ay ku jiraan isbedelada soo socda.

- Wixii hawlo qaran/wadan ah, waxaanu si adag u dhaqan gelin doonaa dariiqa waxqabadka ee hadda jira, kaas oo qoondaynaya saqaf ugu sareeya oo ah £200,000.
- Deeqaha la siiyo ururada, waxaanu si adag u dhaqan gelin doonaa dariiqa waxqabadka ee hadda jira, kaas oo qoondaynaya saqaf ugu sareeya oo ah £100,000.
- Haddii aad dalbanayso hawlo qaran/wadan, ma dalban kartid wax ka badan £200,000. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan hawlaha qaran/wadan, eeg qaybtqa 'waxa aad dalban karto' ('What you can apply for') ee waraaqaha hagitaanka ee Deeqaha farshaxanka.
- Haddii aad urur ahaan dalab u samaynayso, ma dalban kartid wax ka badan £100,000. Wixii warbixin dheeraad ah, eeg qaybtqa 'waxa aad dalban karto' ('What you can apply for') ee waraaqaha hagitaanka ee Deeqaha farshaxanka ee ururada.

Waxaanu si aad ah kuu soo jeedinaynaa inaad talobixin naga hesho, haddii isbedeladaasi ay saamayn ku yeelanayaa hawshaada. Kooxdayada su'aalaha/wax weydiinta waxay bixin karaan warbixin guud oo ku saabsan dalab samayn ama waxay kugu xidhiidhinayaan cidda aad doonayso inaad la hadasho. Waxaad nagala soo xidhiidhi kartaa halkan.

- Telefoon: 0845 300 6200
- Email: enquiries@artscouncil.org.uk
- Telefoon-qoraal: 020 7973 6564

© Arts Council England, March 2007 (Councilka Farshaxanka ee Ingiriiska)



Deeqda la siiyo Fanka - Ashkhaasta iyo Ururada

This is the Somali version
(Qoraalkani waa Somali)

'Guddida Fanka Iglan "Arts Council England" waxa uu ka shaqeyaa in fan badan, dad badani helaan oo meelo badana laga helo. Waxaan kobcinaa oo gacan siina fanka dhammaan 'England', annaga oo u dhaqmeyna sida ha'yad madaxbannaan oo aan xukuumadu faragelin.

Inta u dhaxeysa 2006 iyo 2008 , £1.1 bilyan oo lacagta dadweyne ah oo ka imaneysa xukumada iyo 'National Lottery' ayaan maalgelin ugu sameyneyna in lagu taageero fanka. Tani waa lafdhabarta taageerada fanka ee 'England'.

Waxaan aaminsanahay in fanku leeyahay awooda wax ka bedelka nolosha iyo beelaha, oo uuna fursad u sameeyo dhammaan dadka dalka degan'

Deeqaha fanka loogu talogaley ee ururada la siiyo iyo wax-qabadka dalka oo dhan (national activities) waxa laga bixiya 'National Lottery'. Laga bilaabo Abriil 2007, Deeqaha loogu talogaley fanka - ashkhaasta iyana waxa laga bixinaya 'National Lottery'.

Deeqaha loogu talogaley fanka (Grants for the arts)

Deeqaha loogu talogaley fanka waxa loola danleeyahay ashkhaasta, ururada fanka iyo dadka kale ee u isticmaala fanka shaqadooda. Waxa loogu talogaley waxqabadka la xidhiidha fanka ee faa'ido u ah dadka reer 'England' ama caawiya fannaninta iyo ururada fanka ee reer 'England' in ay gutaan hawshooda. Deeqaha loogu talogaley fanka waa barnaamij xidhiidhsan. Ma laha wakhti kama dambeys ah oo uu dhammaado, laakiin waxaan leenahay ujeedo ah in joogto loo horamariyo (fiicneeyo). Taas macneheedu waxa weeye in marka mudo la joogaba ay suurogal tahay in la soo ban-dhigo wax cusub.

Waxaad ka heleysa waxyaaba u dambeeyey ee la codsado haddii aad booqato 'www.artscouncil.org.uk' ama taleefan u dirto kooxda waxa la weydiiyo ee 0845 300 6200.

Sida caadiga ah waxaan go'aan kaga gaadhna codsiga dhameystirin mudo:

- Lix todobaad oo la shaqeynay codsiga ah £5,000 ama ka yar; ama
- Laba iyo toban todobaad oo la shaqeynayo codsiga ka badan £5,000

Waxaan rabna in maalgelintayadu wax kordhiso oo aad ka faa'ideysato inta ugu badan, meelo kale ee wax bixiya haddii ay jiraan. Sida caadiga ah waxaan ka fileyna in boqolkiiba toban isku darka guud ee kharshkaaga aad ka hesho meel kale.

Ujeedooyinka

Ujeedooyinka deeqaha fanka loogu talogaley waxa weeyaan:

- 'in ay taageerto in dad badani ay ka qayb qaatan fanka;
- in ay siiso oo u abuurto fursado caruurta iyo da'yarta;
- in ay taageerto horamarinta fannaninta ururada fanka iyo dhaqaalaha hal-abuurka;
- ka qaybqaadashada fanka & fannaninta in ay abuuraan beelo nashaad leh;
- in loo saamaxo fannaninta dalkani caalamka ka shaqeeyaan , ka caalamiga ahina 'England' ka shaqeyn karo, oo ay fannaninta ajnabiga ah iyo ka reer 'England' wada shaqeyn karaan;
- in la abuurto fursado lagu gacansiinayo , looguna dabaaldegayo kala jaad ahaanta (diversity);
- horemarinta fulinta hawleed iyo wax soo saarka ururada fanka iyo iyo qaybta fanka.

"Kala jaad ahaanta" (diversity) waxaan ula jeedna in aan ka jawaabi karo arrimaha la xidhiidha midabka, jinsiyada, diinta, naafada, nooca galmada, dabaqada iyo faa'ido-darrada dhaqaale - iyo carqaladaha bulsho ama haya'adeed ee ka xanabi kara dadka ka qaybqaadashada iyo ku raaxeysiga fanka.'

Yaa dalban kara

Deeqaha loogu talo galey ashkhaasta

Deeqaha fanka loogu talogaley - waxa heli kara ashkhaasta:

- fannaninta;
- jileyaasha;
- qoreyaasha;
- abaabuleyaasha;
- soo ban-dhigeyaasha
- masu'linta matxafyada iyo maktabadaha;
- soo sareyaasha
- kooxaha ashkhaasta ka kooban;
- ashkhaasta kale ee ka shaqeeya fanka.

Deeqaha ashkhaasta la siiya sida caadiga ah waxay u dhexeeyaan £200 illa £30,000, waxayna dabooli karaan wax-qabad illa saddex sano soconaya. Waan bixin karaa deeqo ka badan oo mudo ka dheer ah iyo mashaariic badan oo kale.

Deeqda isku celceliska ah ee ashkhaasta ee sanadada 2005/2006 waxa ay aheyd £5,580.

Deeqaha la siiyo ururada

Deeqaha loogu talo galey fanka - ururada heli kara waxa weeye:

- ururada fanka;
- dawlada hoose iyo ururada dadweynaha ee kale;
- iskashatooyinka iyo ururada wada-jirka;
- ururada dhamman dalka ka shaqeeya iyo kuwa gobolada;
- ururada wax-qabadkoodu aanu sida caadiga ah la xidhiidhin fanka, oo ay ku jiraan kooxaha iska-wax-u-qabso iyo kuwa beelaha; iyo
- kooxaha ururada (mid ka mid ah aya loo baahanyahay in ay hormood ka noqoto oo masu'liyada qaado inay maamusho codsiga iyo deeqda).

'Urur' waxaan ula jeedna koox dad ah oo wada jir oo adeegaya himilo guud. Taasi waxa ay noqon karta noocyo badan (metal, shirkad xadidan, urur samofal, ama koox aan diwaangashaneyn). Haddii aad dalabato deeqda fanka loogu talo galey u aad sameyneyso adiga oo urur ah, waa in aad xisaab 'bank' leedahay oo laba qof magac ururka ku saxiixi karaan.

Deeqaha ururadu caadiyan waxa ay udhexeeyaan min £200 illa £100,000 oo waxa ay dabooli kara wax-qabad soconaya illa saddex sanno . Isku celcelis deeqaha ururadu sanadadii 2005/2006 waxa ay ahaayeen £21,634

Yaa aan dalban Karin

Ashkhaasta iyo ururada soo socda ma dalban karaan deeqda loogu talo galey fanka.Haddii aad Dabaqadahan aad ku jirto uma qalmo in la qiimeeyo codsigaagu:

- Ururada macaashka u qaybiya xubnaha ama saamileyaasha, haddii aan wax-qabdka aad dalabka u sameysey gaar uu aheyn mashruuc fanka ah oo faa'ido u ah dadweynaha.
- Ardeyda , wax-qabad la xidhiidha koorska waxbarashada ama lacagta fiiga ah ee waxbarashada (ardey waxaan ula jeedna ruux kooras waxbarasho ku jira oo dugsi, kulliyad ama jaamacad).

- Ururada toos deeqda nooga hela ee aan ka heysan heshiis qoraal ah sarkaalka qaabilsan In ay dalbka sameeyaan.
- Ha'yadaha waxbarashada goonida ah ee aan wax-qabadku waxtar u aheyn beel-weynta iyo fannaninta.
- Ashkhaasta iyo ururada degan meel ka baxsan Midowga Yurup

Waxa aad dalban karto

Waxaan u qoondeyney deeqaha logu talo galey fanka in ay kugu dhiirigeliyaan in aad horemariso ra'yigaaga, la xidhiidha baahidaada fanneed iyo qorsheyaasha mustaqbalka. Waxa aan ujeedadayadu tahay in aan debecsanaano oo dhiirigelino aara'ada cusub. Waxaan taageera wax-qabadka waxtar u ah dadka reer 'England' ama caawinaya fannaninta iyo ururada fanka ee reer 'England' in ay gutaan waajibkooda shaqo.

Wax-qabadkaagu intiisa badan waa in u ka dhacaaya 'England'. Waxa jirta marar ka reeban tan oo ah marka fannaninta iyo ururada fanka ee reer 'England' ay ka qaybqaataan wax-qabad dalal kale ka dhacaaya. [Fadlan eeg warqad- wareedka '*International activity*' (wax-qabadka caalamiga ah) si aad war dheeraad ah u hesho; waxaad tan meel kala heleysa warqad-wareedyada kale ee 'website' kayaga, www.artscouncil.org.uk].

Waxaad u dalban karta deeq wax-qabad mudo go'an soconaya oo fanka la xidhiidha, sida kuwan soo socoda:

- Mashaariicda iyo dhacdooyinka
- Guddiyada iyo soo saarista
- Baadhista iyo horemarinta
- Wax-qabadka dadku ka qayb qaadanayo
- 'Horemarinta dhegeysteyaasha/daawadeyaasha' (Wax-qabadka gaar ahaan loola jeedo in u daboolo baahida daawadeyaasha / dhegeysteyaasha. Matal, wax-qabadka kordhinaaya tirade dadka ka qayb qaadanay iyo kuwa ka qayb galya fanka.)
- Wax-qabadka suuq-geynta. (Matal, wax-qabadka horemarinaaya fahamka cidda ka qayb geliya iyo kuwa ka qayb qaadanya dhacdooyinka fanka, ama wax-qabadka kordhinaaya tirada heerka dadka ka qayb qaadanaya fanka.)
- Wax-qabadka waxbarashada

- libsigaha hanti ma guurto ah sida qalabka, gadiidka iyo aaladaha
- Sameynta daraasada odoroska (daraasada tijaabinta qorshe dhisme) ama horemarinta naqshad dhisme oo loo isticmaalidoono fanka. (Waa In aad heshiis qoraal ah naga hesha inta aanad dalbka sameyn. La xidhiidh kooxda wax la weydiyo adiga oo telefanka 0845 300 6200 u Diraya ama emailka enquires@artscouncil.org.uk. Waxa ay kula xidhiidhsinayaan unnuga maamulka deeqda ee xafiiska gobolka ku qaabilsan).
- Dib-u-qalabeynta, hagaajinta iyo iibsiga dhisme lagu isticmaalidoono fanka. (Waa in aad heshiis qoraal ah naga hesha inta aanad dalabka sameyn, ama suurogal noo noqon meysa in aan qiimeyno dalabkaaga. La xidhiidh kooxda wax la weydiyo adiga oo u diraya emailka: enquires@artscouncil.org.uk ama telefanka 0845 300 6200. Waxa ay kula xidhiidhsinayaan unnuga maamulka deeqda ee gobolkaaga qaabilsan.)
- Fanka dadweynaha
- Tababar iyo horemarin farsamo, oo ay ku jiraan deeqo safar
- Deeqo lacageed oo waxbarasho jaamicad/ kulliyad (Bursaries)
- Deeqo wax-barasho (fellowships)
- Horemarinta ururada ee ku aadan hagaajinta ururada fanka mudada Dheer
- Degaanada (Residences)
- Booqashooyin (Touring)

Waxa kale lacag siin kara wax-qabad dalka oo dhan ah. Deeqahu caadiyaan waxa ay u dhexeeyaan min £5,000 illa £200,000. Deeqda isku celceliska ah wax-qabadka dalka oo dhan ah ee 2005/2006 waxa weeye £41,152.

Tusaalooyin wax-qabad dalka oo dhan ah waxa ku jiri kara kuwan so socoda:

- Mashaariic booqashooyin dalka oo dhan ah
- Dhacdo fanneed qaran oo weyn oo muhim ah oo mar keli ah, oo ay ku jiraan shirarka waaweyni.
- Wax-qabad ka dhacaaya hal gobol wax ka badan oo ay ku jiraan dabaaldegyadu, waxa-qabadka horemarinta dhegeysteyaasha / daawadeyaasha , mashaariicda tababarada iyo degaanada.
- Ban-dhigyada iyo carwoyinka la soo bandhigo hawlaha fanka (hal gobol wax ka badan) ee ay sameeyaan fannaninta caalmiga ah iyo ururada fanku.
- Wax-qabad ka dhasha wada-shaqeyn dhex marta fannaanin iyo

ururada fanka oo 'England' oo dhan ah

Marr kasta, waxa dhici karta in dalabkaagu uu koobayo wax ka badan hal nooc oo wax-qabad. Tusaale ahaan, waxaad dalban karta kharshka booqashooyinka, gaadhi-xamuul (van) cusub iyo horemarin xirfadeed oo kuwada jiri kara hal codsi. Waan kala talineyna sidaad u sameyn laheyd tan, iyo in ay kugu haboontahay tani. Kala xidhiidh kooxdayada wax la weydiiyo taleefanka 0845 300 6200 ama emailka enquires@artscouncil.org.uk

Waxa aadan codsan kareyn

Ma codsan kareysid wax-qabadkan soo socoda:

- Wax-qabadka aan xidhiidh la laheyn fanka
- Soo saarista filim iyo fiidow iyo ban-dhig sinime, haddii aaney Taageereyn fannanin ka shaqeynaya muqaal socda (moving image). Fadlan eeg warqad-wareedka '*The moving image*' si aad faahfaahiin dheeraad ah u hesho waxa aan lacag ku bixino iyo kuwa aanan lacag ku bixin muqaalka socda.
- Tababar ama wax-qabad waxbarasho, ama wax-qabad xubno Dadweyne ka qaybqaataan, oo inta badan ama fanka la Isticmaalaya yahay filim ama fiidow, haddii aaney taageereyn hawl Fannanin oo muqaal socda ah
- Iibsiga hanti ma guuraan oo loogu talo galey filim ama fiidow, haddii aaney taageereyn hawl fannanin oo muqaal socda ah
- Wax-qabad aan waxtar la taaban karo u laheyn dadweynaha mudo gaaban iyo mid dheer toona
- Wax-qabad, ay ku jiraan iibsiga alaab ama adeeg, dhacey ama bilowdey intii aaney suurogelin in go'aan laga gaadho codsiga
- Wax-qabad, qalab ama dhacdo labeynaaya wax hore u jirey
- Kharash hore loogu daboolay maalgelin
- Kharashyo guud oo socda iyo kharash dul-socod ah oo laga bixiyo Dakhli kale, oo ay ku jirto maalgelintiinu
- Kharash dul-socod ah oo la xidhiidha qalab ama dhisme, sida caymiska, kharashyada dayactirka
- Dhacdooyinka lacag lagu soo saarayo, sida xaflad samafal oo aan fanka waxtar u laheyn
- Qalab gacantii labaad ku jira (oo ay ka baxsanyihiin aalada muusiga qaar ka mid ah iyo qalab khaas ah. Fadlan eeg warqad-wareedka '*Musical instruments*' iyo qalabka gacanta labaad ku jira si aad

faahfaahin u hesho

- Wax-qabadka iyo dhacdooyinka inta badan ka dhacaaya meel ka baxsan 'England' (Qaar ba ka reeban tan – tusaale, deeqda loogu talo galey safar caalami ah ama tababar, iyo isweydaarsi caalami ah – laakin wax-qabadkan waa in waxtar u yahay ashkhaas iyo fannanin ku nool , iyo ururo degan, 'England'. Fadlan eeg warqad-wareedka '*International Activity*' sii aad faahfaahin u hesho
- Wax-qabadka aan waxtar u aheyn dad degan 'England' ama aan taageereyn fannanin iyo ururo fanka ah oo reer 'England ah si ay u gutaan hawshooda
- libsigaa qalab iyo aalado aan waxtar dadweynaha u aheyn iminka ama mudada dheer ama aanu codsaduho laheyn taariikh fanneed la raad raaci karo
- Wax-qabadka isban-dhiga ah ee aan waxtar u aheyn dadweynaha ama Iminka ama mudada dheer, ama aan codsaduho laheyn taariikh fanneed la raad raaci karo
- Wax-qabad ku saleysan waxbarasho caadi ah oo qasdi barasho leh oo sharci ahaan daruuri ah

Taxane buuxa oo waxyaabaha aanan u maalgelin siin ah waxaad kale oo ka heli kareysa ' website' aanu leenahay ee, www.artscouncil.org.uk iyo qoraalka tilmaamaha ah Deeqaha (Grants) ee lagu talo galey fanka

Xidhmada codsiga ee wada socota waxa ay ka caawineysa in aad go'aan ka gaadho in kani yahay ill ku haboon maalgelinta mashruucaga. Illo kale oo maalgelin ah oo 'National Lottery' ah aya hoos ku taxan.

Illo kale oo maalgelin ah oo 'National Lottery' ah

Weydiin guud oo ku saabsan maalgelinta 'National Lottery', booqo www.lotteryfunding.org.uk ama taleefan u dir ' National Lottery funding helpline' ee 0845 275 0000

Abaalgudka Cid Kasta

www.awardsforall.org.uk

taleefanka :0845 600 2040

'Big Lottery Fund'

www.biglotteryfund.org.uk

Taleefanka: 0845 410 2030

Gudida Filimada (Film Council)

www.ukfilmcouncil.org.uk

Phone: 020 7861 7861

'Heritage Lottery Fund'

www.hlf.org.uk

Taleefanka: 020 7591 6000

**'NESTA (National
Endowment for Science,
Technology and the Arts)'**

www.nesta.org.uk

Taleefanka: 020 7645 9500

Ciyaaraha 'England' (Sport England)

www.sportengland.org

Taleefanka: 0845 850 8508

Ciyaaraha UK (UK Sport)

www.uksport.gov.uk

Taleefanka : 020 7211 5100

Muusiga Dhalinyarada (Youth Music)

www.youthmusic.org.uk

Taleefanka: 020 7902 1060

'Arts Council England'
14 Great Peter Street
London SW1P 3NQ
Website: www.artscouncil.org.uk

Taleefanka : 0845 300 6200
Textphone: 020 7973 6564
Email: enquiries@artscouncil.org.uk
'Charity registration number 1036733'

Waxaan ballan-qaadney in mar kasta nala heli karo. Waa ogol lahey falo kasto oo hawshayada ah. Fadlan u soo dir :Andrew Whyte, Executive Director, Communications ee 'Arts Council' cinwaanka kor ku qoran.

Warkan waxaad ku heli karta farta waaweyn ee loo yaqaan 'Braille', oo ku duuban cajald 'CD' ah, iyo luqada Dhegooleyaasha mid ah oo 'British Sign Language' (BSL) DVD oo farsamo 'electronic' ah. Fadlan nala soo xidhiidh haddii aad kuwan mid ahaan u baahantahay.

Warkan waxaad ku heli karta waraaqo luqooyin kala duwan ah oo aan Ingiriisi aheyn, **haseyeeshe codsiga waxaan ku aqbala luqada ingriisida oo keli ah.**